# Qorshaha Abuurista Xafiiska Maine u qaabilsan Ameerikaanka Cusub: Guudmarka Xogta

Dhammaan mudadii uu jiray, Gobalka Maine ayaa soo dhaweeyay dadka gobalka ku cusub iyo qoysaska ka kala imaanaaya daafaha caalamka. Laga bilaabo warshadaha waawayn ee daafaha wabiyadeena, ilaa kaydmaheena shaqada iyo beeraha qoysaska, ilaa kaluumaysigeena caanka ah iyo dekadaha ganacsiga ee ku yaala xeebaheena, jiilal soo galooti ah ayaa door ka qaatay aasaaska dhaqaalaha iyo bulshada ee Maine, ayagoo balaarshay oo xoojiyay dhaqaalaha, shaqaalaha, bulshooyinka, iyo dhaqanka.

Sida Maine u barto uguna misho dadka wadamada shisheeye ku dhashay iyo qoysaska ayaa cusbooneysiiyay muhiimada maanta, ayadoo laga eegaayo caqabadaha la filaayo ee mustaqbalka iyo kuwa hadda ee bulshada iyo shaqaalaha. Da'da ugu badan ee Maine, 45.1, ayaa ah da'da ugu wayn wadanka, bulshada ugu badan ee da'da shaqada ee gobalkeena (da'aha 20-64) ayaa la filayaa inay hoos u dhacdo 5.3% sanadka 2030[1]. Sida lagu sheegay dabaacaada 2022 "Making Maine Work," geerida gudaha Maine ayaa ka badanaysay tirada dadka dhalanaaya in ka badan toban sano, taasoo ah marxalad la filaayo inay sii socoto caqabadna ku ah dhaqaalaha gobalka.

Mudada fog, Qorshaha Hormarinta Dhaqaalaha Gobalka ee 10 sano ah ayaa aqoonsaday baahi loo qabo in lagu kordhiyo 75,000 oo qof shaqaalaha Maine 2030. Istaraatiijiyada ayaa sheegaysa in xal u helida baahidaan ay tahay muhiimadeeda koobaad, oo ah caqabad hadda loo arko mid walaac dhaqaale iyo mid bulshaba ku haysta Maine.

Warbixinno dhawaan soo baxay ayaa sheegay in dhaqaalaha xoogan ee Maine, kaasoo loo arko mid kamid ah heerarka kobaca dhaqaalaha ugu caafimaadka badan wadanka, uu ku kordhaayo xawaare ka badan heerka shaqaalaha. Tan ayaa muujinaysa in Maine ay tahay meel xiiso leh in lagu noolaado, laga shaqeeyo laguna sameeyo ganacsi, laakiin waxay hoosta ka xariiqaysaa sababta Maine ay qasab tahay inay shaqaale dheeri ah ku darto gobalka ayna xaqiijiso inay kor u qaadi karaan xirfadooda iyo dhaqaalaha ay helayaan. Soo galootiga ayaa qayb muhiim ah u noqon kara xeelada, gaar ahaana dhinacyada dhaqaalaha Maine ee u leh baahiyaha ugu badan ee shaqaalaha, sida daryeelka caafimaadka, dhismaha, iyo hudheellada.

Xarunta Cilmi Baarista iyo Xogta Shaqaalaha ee Maine (CWRI) ayaa soo sheegtay in shaqooyinka Maine ay gaareen heerarkii ugu sareeyay afar bilood oo xiriir ah oo ku dhamaanaayay Nufeembar 2023, xaalad keentay in shaqaale kasta oo shaqo la'aan ah helo labo shaqo oo banaan gudaha Maine. Inkastoo ay u fiican tahay dadka shaqo raadiska ah, inaan la helin shaqaale ku filan ayaa xadidaysa kobaca waxayna culeys dheeri ah saaraysaa ilaha shaqaalaha ee ganacsiyada waawayn. Sida ku cad warbixinta Cabirada Kobaca ee 2023 ee kasoo baxday Gudiga Kobaca Dhaqaalaha Maine sheegtay, "si kor loogu qaado shaqaalaha Maine, loona yareeyo marxaladahaan, Maine waa inay so jiidataa dad dheeri ah oo da'da shaqada ku jira oo ay ka hesho goballada kale iyo wadamada, ay ceshato dad badan oo ah dhalinta gobalka, ayna ka caawiso in dad badan oo reer Maine ah ka qaybgalaan shaqaalaha."

---

[1] Isha xogta: Xafiiska Dhaqaalaha Gobalka: https://www.maine.gov/dafs/economist/sites/maine.gov.dafs.economist/files/inline-files/Maine%20Population%20Outlook%20to%202030_0.pdf

Kor u qaadista sida Maine u soo dhawaynayso uguna darayso dadka Mareykanka Ku cusub bulshooyinkeeda iyo dhaqaalaha ayaa loo arkaa mid kamid ah xeelada ugu muhiimsan si loo xaliyo caqabadaha dadka ee gobalkeena ayna door uga qaadato dedaallada guud ee xoojinta shaqaalaha Maine, taasoo ay sidoo kale ku jiraan kor u qaadista dadka goballada kale ka yimaada, xoojinta ka qaybgalka shaqaalaha, ku haynta gobalka dhalinta gobalkeena, balaarinta fursadaha la heli karo ee tababarka yo hormarinta shaqaalaha.

Tan ayaa fursad u siinaysa gobalka inuu raadiyo qaabab ku aadan sida uu u fududeynaayo uuna diirada u saaraayo sahlida xeerka, luuqada, sharciga, shaqaalaha, iyo taageerooyinka loo shaqeeyaha ee dadka wadanka ku cusub iyo bulshooyinka; in la abuuro farsamooyin hal abuur leh oo lagu xoojinaayo isdhexgaka dhaqaalaha; iyo in la gaaro go'aannada xeerka oo leh xog buuxda oo bulshada ku aadan, iyo iskaashi lala sameeyo, bulshooyinka soo galootiga ah.

Bishii Agoosto 2, 2023, Gudoomiyaha Gobalka Janet Mills ayaa soo saartay Amar Fulineed ku amraaya Xafiiska Gudoomiyaha ee Hal abuurka Xeerka iyo Mustaqbalka (GOPIF) si inuu keeno qorshe lagu abuuraayo Xafiiska Ameerikaanka Cusub (ONA) oo ay yeelato dawlada gobalka kaasoo qaas u noqon doona taageerida mudada fog ee isdhexgalka dhaqaalaha iyo bulshada ee dadka soo galootiga ah ee Maine.

Intii lagu jiray xiliga dayrta ee 2023, GOPIF, oo kaashanaaya gobalka iyo ururada maxaliga ah, ayaa sameeyay in ka badan 100 kulannada iskuxirka ah wuxuuna talo ka helay in ka badan 800 oo qof, ayna ku jiraan saamileeyda dhammaan 16 degmo. Ururada iyo shaqsiyaadka ka qaybgalay talooyinka GOPIF waxaa kamid ahaa wakiilo ka socday bulshooyinka soo galootiga ah ee Maine, loo shaqeeyaasha, Waaxaha Ganacsiga ee maxaliga ah iyo kuwa Gobalka, ururada bulshada u adeega, maamullada magaallada, waaxaha maamulka dugsiga (SAUs), xarumaha waxbarashada sare, bixiyaasha daryeelka caafimaadka iyo adeegga, iyo hogaanka wakaalada gobalka.

Waxaa intaas dheer, GOPIF yaa heshay taageero iyo tilmaan uga timid Shabakada Gobalka ee Xafiiska Ameerikaanka Cusub, haayada gobalada Mareykanka oo leh xafiisyo u gaar ah iyo shaqaale isku dubarida isku dhafka soo galootiga. Shabakada waxaa lagu dhisay iskaashi u dhexeeya labo urur, Adeegyada Waxbarashada Aduunka iyo Gudiga Soo Galootiga ee Mareykanka. Si waafaqsan Amarka Fulinta ee Gudoomiye Millls, Maine ayaa noqday gobalka 19[aad] oo ka qaybgala shabakada, kadib markii ay dhawaan horaan ugu biireen Utah, Wisconsin, iyo North Dakota.

Ayadoo la raacaayo hanaankaan, waxaa jiray tirakoob adag oo lagu sameeyo baahida loo qabo kor u qaadista sida Maine u soo dhaweeyo una taageero Ameerikaanka Cusub iyo taageerista baahida loo qabo Xafiiska Ameerikaanka cusub oo laga hirgasho Maine. Ayadoo lagu saleynaayo fikirkaan, warbixintaan ayaa qeexaysa qorshaha abuurista ONA waxayna bixinaysaa talooyin ku aadan aagaga muhiimka ah ee xeerka aasaasiga ah. Meelahaas waxaa kamid ah:

- **Balaarinta iyo xoojinta fursadaha barashada Luuqada Ingiriiska:** Si loo taageero shaqaalaha iyo loo shaqeeyaasha soo galootiga ah, ONA ayaa laga rabaa inay ka shaqeyso gacan siinta balaarinta, kor u qaadista, iyo abuurista fursadaha helitaanka barashada luuqada Ingiriiska, maadaama xirfadaha Ingiriisku ay badanaa tiir dhexaad u noqdaan guusha shaqada.
- **Dhisida tubaha shaqaalaha iyo taageerooyinka shaqo abuurka ee soo gaootiga:** Si loo furo hibooyinka Ameerikaanka Cusub, ONA ayaa taageeri doona fududeynta tubaha xirfada, gaar ahaana kuwa dadka soo galootiga ah ee yimaada Maine ayagoo leh khibrado waxbarasho oo muuqda iyo/ama xirfadeed. Ayadoo loo maraayo ONA, gobalka ayaa sidoo kale taageero siin kara dadka wadanka ku cusub ee aan haysan ogolaanshiyaasha shaqada asagoo siinaaya xogta wakhtigeeda la baxsho ee ku haboon ee ku aadan xeerarka soo galootiga ee federaalka iyo taageerooyinka sharci ee la heli karo, ayadoo yoolku yahay helista dad cusub oo wadanka yimaada si loo xaqiijiyo tubta u qalmida shaqada. Marka laga soo tago gacan ka gaysashada buuxinta shaqooyinka aadka loogu baahan yahay, soo galootiyada ku dhaqan Maine ayay

cabir ahaan ugu badan tahay inay bilaabaan ganacsiyo cusub, kuwaasoo door ka qaadanaaya dhaqaalaha gobalka. ONA waa inuu kor u qaadaa isku dubaridka khayraadka jira si gacan looga siiyo ganacsi abuureyaasha soo galootiga ah inay bartaan, ayna helaan, taageerooyinka ganacsiyada yaryar ee jira si loo siiyo fursado xoogan oo ay guul ku gaaraan.

- **Kor u qaadista isku dubaridka ururada iyo shirkadaha ka qaybgalaaya taageerista soo galootiga:** Mawduuca laga maqlay dhammaan gobalka waa baahida loo qabo kor u qaadista isku dubaridka wakaaladaha gobalka oo dhan, ururada u adeegga bulshada, bixiyaasha caawimaada farsamada, maamullada magaallada, iyo waaxaha maamulka dugsiga. Bulshooyinka, dugsiyada, iyo ururada bulshada ku saleysan ayaa raadin kara khayraad ay ku maareeyaan tirada sii kordhaysa ee dadka cusub, halka waaxaha kale ay u arkaan fursado ay ku soo jiidan karaan soo galooti cusub xeelad ay xal ugu helayaan caqabadaha shaqaalaha iyo bulshada. Maamullada magaallada ama kooxaha ganacsiga ayaa laga yaabaa inay raadiyaan xeelado cusub oo kor loogu qaadaayo goobaha shaqada iyo bulshooyinka soo dhawaynta leh.
- **La socoshada iyo la shaqeynta xeeladaha soo galootiga ee federaalka ee faa'iidada u leh Maine:** Awooda Maine ee kusoo biirinta iyo ku dhafida si guud leh bulshada dadka soo galootiga ah ayaa ku xadidan, oo badanaa ku cayiman, xeerarka, farsamooyinka, iyo habraacyada federaalka, sida lagu sheegay dhawaan dood heer sare ah oo halkaan lagu qabtay, iyo meelo kale oo gobalka kamid ah, ayna hagaan xeerarka aqoonsiyada shaqaalaha ee maamulaaya shaqsiyaadka raadinaaya magangalyada. Gudiga ONA, asagoo la shaqaynaaya Shabakada Gobalka ee ONA, Maine ayaa si joogto ah ula falgeli doonta kana warbixin doonta xeerka federaalka si loogu faa'iideeyo bulshadiisa, dhaqaalihiisa, iyo dadkiisa.
- **Uruurinta xogta wanaagsan ee wakhtigeeda soo baxda ee ku saabsan bulshooyinka soo galootiga ah ee Maine:** Si loo qiimeeyo baahiyaha iyo saamaynada caawimaadaha iyo taageerooyinka, Gobalka ayaa u baahan xog wanaagsan oo ku aadan bulshada soo galootiga ah ee Maine. Khubarada xogta ayaa sidoo kale ka caawin doona ONA inay si fiican u fahmaan baahiyaha bulshooyinka soo galootiga ah oo ayna cabiraan ayna kor u qaadaan hormarinnada saamaynada leh.

Abuuranka ONA ee wadanka oo dhan ayaa muujinaysa in xafiisyadaan ay tahay inay iskaashi joogto ah la yeeshaan wakaaladaha goballada oo dhan xili muhiimadaha iyo waajibaadka la qeexaayo, iyo sidoo kale wada shaqayn joogto ah la sameeyaan, ayna talo ka qaataan, bulshada soo galootiga ah si kor loogu qaado codadkooda loona faahfaahiyo xeerarka iyo jihada barnaamijka. Si looga guul gaaro arintaan, qorshahaan ayaa ku talinaaya:

- In ONA la abuuro laguna daro Xafiiska Hal Abuurka iyo Mustaqbalka ee Xeerka Gudoomiyaha, kaasoo waafaqsan shaqada GOPIF ee ahaanshaha isku dubaridaha muhiimka ah ee sida iskaashiga leh ula shaqeeya wakaaladaha kale ee gobalka iyo saamileeyda si xal loogu helo arimaha adag ee mustaqbalka fog ee Maine waajahaayo.
- Abuurista gudiga khubarada ah si ay talo uga baxshaan ONA, oo ay xubno ku leeyihiin bulshooyinka soo galootiga ah Maine iyo matalaada heerarka balaaran ee ururada iyo waaxaha, ayna ku jiraan caawimaada luuqada iyo sharciga, hormarinka shaqaalaha, ganacsiyada iyo hal abuurka ganacsiga, waxbarashada maxaliga ah iyo tan sare, iyo kuwo kale.

Ayadoo la adeegsanaayo naqshadaan, ONA ayaa sidoo kale awooda inay ka shaqeyso baahiyaha badan ee ay sheegeen saamileeydu kuwaasoo muhiim u ah Ameerikaanka Cusub, sida daryeelka carruurta, gaadiidka, iyo guriyaynta. Dhinacyadaa iyo meelo kale, qorshahaan ayaa muhiimada saaraaya in ONA noqoto xiriiriyaha iyo il xogeed ay wakaaladaha gobalka iyo kuwa dawlada hoose, haayadaha khayriga ah, iyo waaxaha gaarka loo leeyahay helaan si loo kordhiyo fahanka ku aadan baahiyaha gaarka u ah soo galootiga ee dhinacyadaan iyo qaababka loo xalinaayo.

Yoolkaan ayaa muujinaaya shaqada guud ee Xafiiska cusub ee Gobalka ee Ameerikaanka Cusub - si loogu mideeyo wakaaladaha ka shaqeynaaya taageerada amaanka dhaqaalaha ee soo galootiga, iyo in la xaqiijiyo isku dubaridka guuleysta iyo hawl fududeynta dedaallada si loogu dhiiri geliyo dhaqaalaha mudada fog iyo isdhexgalka bulshada.

Soo galootigu waxay muddo dheer door ku lahaayeen dhaqaalaha iyo aasaaska bulshada Maine, ayagoo balaarinaayay oo xoojinaayay dhaqaalaha, shaqaalaha, bulshada, iyo dhaqanka gobalkeena. Inkastoo aan waajahayno caqabado dhanka bulshada sii gaboobaysa ka gobal ahaan, dadka soo galootiga ah ayaa door muhiim ah ka ciyaaraaya inay naga caawiyaan xaqiijinta nolosha bulshooyinka Maine iyo dhaqaalaha jiilalka soo socda.